



Aqoonta Akhriska Erayga (Word Reading Fluency)

Akhrinta erayada dhabta ah si habsami iyo dhaksho ah | Fasalka barbaarinta, fasalka 1'waad iyo fasalka 2'baad

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego isticmaashaa mCLASS DIBELS 8 si ay ula socoto horumarka xirfadaha akhriska ee ilmahaaga inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Isticmaal haggahaan kooban si aad u fahamto imtixaanka hoose ee Aqoonta Akhriska Erayga (Word Reading Fluency [WRF]) ee fasalka Barbaarinta, fasalka 1'waad iyo fasalka 2'baad si aad u ogaato habab fudud oo ciyaar u eg oo aad guriga ku wada tababaran kartaan.

Waxyaabaha aan ka shaqeynayno

Xirfadaan waxay qiimeyneysaa sida fudud ee ilmahaagu u akhriyo ereyada dhabta ah - iyagoon si tartiib ah u kala dhig-dhigaynin dhawaaqyadooda, balse si dhakhso ah oo toos ah u aqoonsanaya. Tani waxay sannadba sannadka ka dambeeya sii yeelanaysaa muhiimad weyn. Ilmaha erayada si dhakhso ah oo toos ah u akhriyaa wuxuu helayaa awood maskaxeed oo dheeraad ah oo uu diirada ku saari karo macnaha dhabta ah ee erayadaas.

Xirfadaha ay arrintaan sii dhiso

Ku dhawaaqida qaybaha erayada

Awooda lagu isticmaalo dhawaaqyada xarfaha si loo fahmo erayada aan la aqoon.

Wacyiga dhawaaqyada xarafka goonida (phonemic)

Dareemid raaxo marka la maqlayo iyo marka la maamulayo dhawaaqyada ku jira erayada lagu hadlayo.

Soo bandhigida erayga aragtida (sight word)

Horey buuggaga uga arkay erayada caadiga ah.

Hababka higaada

Aqoon u lahaanshaha qaababka xarfaha ee caadiga ah iyo qoysaska erayada.

Habab xiiso leh oo guriga loogu sameeyo tababar - 5 ilaa 10 daqiiqo, dhowr mar asbuuci

Diyaar-garowga liiska erayada

3 ilaa 4 daqiiqo

Si wada-jir ah u akhriya liis gaaban oo erayo ah dhowr jeer muddo dhowr maalmood ah – ku-celcelintu waxay ka caawisaa erayada inay noqdaan kuwo si dabiici ah ama si toos ah loo xusuusto.

Ka fiicnaaw wakhtigaagii hore

3 daqiiqo

Cabbir waqtiga ay ku qaadanayso akhrinta liis erayo ah, ka dib'na maalinta ku xigta mar kale isku day si aad u aragto in ilmahaagu uu ka fiicnaan karo waqtigii hore ee uu gaarey.

Kala-soocida qoyska erayada

5 ilaa 8 daqiiqo

Isku uruuri erayada leh qaab isku mid ah, sida cat, hat, iyo mat, oo wada akhriya si aad u aragtaan qaabkaas.

Tooka tooka ku qaata akhriska

5 ilaa 8 daqiiqo

Wada akhriya bog aad jeceshihiin, idinkoo isku beddelaya akhrinta saf kasta; si uu ilmahaagu u helo tusaale muujinaya sida si habsami leh loo akhriyo, isagoo isla markaasna sameynaayo tababarkiisa.

Waxyaabaha la eegayo

- * Haddii uu ilmahaagu ku dhawaaqi karo erayada laakiin uu u sameynaayo si gaabis ah oo dadaal badan, taasi waa marxalad xaga aqoonta, ee ma aha dhibaato kala saar-saar - tababar badan ayaa ku caawinaysa.
- * Akhrinta isla buuggag oo marar badan la akhriyo waa hab aad u wanaagsan oo aan culays lahayn oo lagu horumariyo aqoonsiga erayada.
- * Haddii akhrinta erayadu ay weli aad u dhib badan tahay markii uu sannad dugsiyeedka sii socdo, u sheeg macalinka.

Xusuusin gaar ah oo ku socota qoysaska:



Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego

Waaxda Akhriska Iyo Qoraalka | Haggaha Qoyska | Aqoonta Akhriska Erayga

WRF

Haggaha Qoyska

- **Ilmahaaga sii waqti uu erayada ugu dhawaaqo.** Akhrinta erayada si sax ah ayaa ugu horreysa. Marka la sameeyo tababar, waxaa fududaado in la akhriyo erayada la yaqaano.
- **Si dhow u eeg xarfaha.** Haddii ilmahaagu uu qiyaaso eray, si tartiib ah u caawi inay ku dhawaaqaan dhawaaqyada oo ay isku daraan.
- **Tababarka ka dhig mid gaaban oo wanaagsan.** Dhowr eray markiiba waa ku filan yihiin. **Ku** dabaaldega dadaalka iyo saxnaanta adigoon dareemin cadaadis ah inaad waqtiga ka hormarto.